# Foomka Diiwaangelinta Iibiyaha/Qofka Lacagta Helaaya

## Tilmaamaha Ku Saabsan Buuxinta Foomka Diiwaangelinta Iibiyaha/Qofka Lacagta Helaaya

**Foomka Diiwaangelinta waa in loo adeegsado waxyaabahaan soo socda:**

- Diwaangelinta Lambarka Iibiyaha Gobolka Washington oo cusub.
- Magaca sharciga ah ee cusub (tusaale ahaan: badelka magaca ugu dambeeya, badelka magaca shirkada).
- Lambarka aqoonsiga canshuur bixiyaha cusub.

**Ogoow:** Haddii aad gacanta ku qorayso halkii aad kumbiyuutar ku qori lahayd, fadlan si cad ugu qor FAR-WAWAYN oo khad buluug ama madoow oo kaliya ah. Foomamka lama aqbali doono haddii qad cad lagu tirtiray, haddii istilaab la saaray, ama haddii wax lagu dul qoray. Haddii aad tahay shirkad shisheeye, fadlan soo gudbi foomka W-8 ee IRS (Internal Revenue Service, Hay'adda Adeegga Dhakhliga Gudaha). Waxaad foomkaan ka heli kartaa Webseedka IRS. Waa inaad haysato US TIN (Taxpayer Identification Number, Lambarka Aqoonsiga Cashuur Bixiyaha) Mareykanka si aad iskaga diiwaan geliso Gobolka Washington.

**Qaybta A - Xogta Xiriirka:**

- Ciwaanka Boostada – Fadlan qor ciwaanka aad rabto inaad ku hesho lacagta iyo/ama fariimaha.
- Magaca Xiriirka - Qofka halkaan lagu magacaabay ayaa lala xiriiri doonaa si loo ansixiyo isbadel kasta oo mustaqbalka ku yimaada diiwaangelintaada oo ay ku jirto lacag wareejinta elektarooniga ah. Haddii aad tahay ganacsi, waxaa QASAB ah in la bixiyo magaca qofka lala xariiraayo.
- Lambarka Talefoonka - Lambarka taleefanka qofka la xiriiraayo ee oggolaanshaha haysta.
- Ciwaanka Iimaylka - Ciwaanka iimaylka ee la bixiyay waxa loo isticmaali doona habka xiriirka aasaasiga ah (waxa laguugula soo xiriiri doonaa iimayl oo laguugu soo diri doonaa Lambarkaaga Iibiyaha Gobolka Washington).

**Qaybta B - Diiwaangelinta (W-9):**

- Dhammaan qaybaha lambarada leh marka laga reebo qaybta 4 aad ayaa loo baahan yahay.
- Haddii aad tahay shirkad caafimaad ama sharci/qareen oo aad IRS-ta ka fayl-gareeyso shirkad ama shuraako, fadlan ku qor nooca shirkadaada sanduuqa 4-aad.
- Waxaa QASAB ah inaad bixiso SSN (Social Security Number, Lambarkaaga Amniga Bulshada) ama EIN (Employee Identification Number, Lambarka Aqoonsiga Shaqaalaha). HA bixin labadaba.

**Bangi Adeegsiga Lacag Wareejinta Elektarooniga ah:**

Si aad u hagaajisato lacag wareejinta elektarooniga ah, buuxi oo dir Direct Deposit Authorization Form (Foomka Oggolaanshaha Lacag Wareejinta Elektarooniga) ah.

**Isbadelada iyo Ku darista Goobaha Dheeraadka ah:**

Si aad isbadel ugu sameyso diiwaangelinta hadda jirta ama aad ugu darto/uga tirtirto goobo diiwaangelinta hadda jirta, fadlan buuxi oo soo dir Change Form (Foomka Badelka).

**Sanduuqa Saxiixa:**

Fadlan ku saxiix qalin qori ("saxiix qalinka lagu sameeyo"). Saxiixyada elektarooniga ah, la soo geliyo ama shaabada ah lama aqbali doono. Foomkaan looma aqoonsanaayo inuu ansax yahay ilaa in la saxiixo ma ahee.

**Gudbinta Foomka Diiwaangelinta Iibiyaha/Qofka Lacagta Helaaya:**

Fadlan DAABAC oo SAXIIX foomka aad buuxisay
ISKAAN GAREE oo ka dhig Nooca PDF kadib IIMAYLKAAN ku dir: payeeforms@ofm.wa.gov
FAKISKAAN ku dir: (360) 664-3363 AMA
BOOSTADAAN ku dir: Statewide Payee Registration, PO Box 41450, Olympia, WA 98504-1450
Haddii aad qabto su'aalo la xariira foomka, fadlan la xariir Waaxda Diiwaangelinta Iibiyaha (Payee Registration Unit) oo aad kala xiriiri karto (360) 407-8180 ext.5 ama su'aalo kasta oo kale, fadlan la xariir hay'ada aad ka filanayso lacagta.

FADLAN BIIN HAKU DHAJININ

# Foomka Diiwaangelinta Iibiyaha/Qofka Lacagta Helaaya

## QAYBTA A - Xogta Xiriirka:

Ciwaanka Boostada: ____________________

Magaalada, Gobalka, Boostada: ____________________

Magaca Qofka Lala Xiriiraayo: ____________________

Lambarka Taleefoonka: ____________________

Ciwaanka Iimaylka: ____________________

## QAYBTA B - Diiwaangelinta Iibiyaha/Qofka Lacagta Helaaya: Codsiga Lambarka Aqoonsiga Cashuur Bixiyaha iyo Caddeynta - Foomka W-9 ee Badelka ah

**1. Magaca Sharciga ah** (sida ka muuqata canshuur celintaada dakhliga):

____________________

**2. Magaca Ganacsiga, haddii uu ka duwan yahay Magaca Sharciga ah ee Kore** - tusaale ahaan, Magaca DBA (Doing Business As, Ku Sameynaya Ganacsiga Sida)**:**

____________________

**3. KALIYA HAL sanduuq Calaamadee:**

- ☐ Shirkada (oo ay kujirto S-Corp, LLC S-Corp iyo LLC-Corp)
- ☐ Shaqsiyaadka/Shirkada Halka Qof Leeyahay (Oo uu kujiro Mulkiilaha LLC-kaligiis ah)
- ☐ Dawlada Gobalka
- ☐ Dawlada Federaalka (oo ay kujiraan Qabiilka)
- ☐ Mutadawac
- ☐ Iskaashato
- ☐ Xubin kamidka ah Gollaha/Guddiga
- ☐ Helida Waayo aragnimada – Dabaqada 1 aad
- ☐ Ururada aan khayriga Ahayn
- ☐ Dawlada Deegaanka
- ☐ Urur Ka Reeban Sharciga Canshuurta
- ☐ Shirkad/Hanti Dhul

**4. Shirkad ama Iskaashato oo KALIYA**, calaamadee hal sanduuq oo hoose haddii ay khuseyso:

- ☐ Caafimaad
- ☐ Qareen/Sharci

**5. Ciiwaanka Sharciga ah** (lambarka wadada iyo lambarka dhismaha ama guriga) Kani waa inuu noqdo ciwaanka ku yaala faylka IRS:

____________________

**6. Magaalada, Gobalka, Boostada:** ____________________

**7. Lambarka Aqoonsiga Canshuurta (TIN) FADLAN CALAAMADEE MID**

- ☐ Ka shaqsi ahaan, kani waa Lambarkaaga Amniga Bulshada (SSN)
- ☐ Hay'adaha kale, kani waa lambarkaaga aqoonsiga shirkada (EIN)

Geli lambarkaaga EIN ama SSN (HA gelinin labadaba):

| | | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | | | | |

**8. Caddeynta**

**Aniga oo og ciqaabta been abuurka, waxaan caddeynayaa in**

**I. Lambarka ku qoran foomkaan yahay lambarkayga aqoonsiga cashuur bixiyaha saxda ah (ama waxaan sugayaa in lambar la ii soo saaro), iyo**

**II. Aniga la igama qaado canshuurta laga jaro dakhliga maalgashiga sababo ah: (a) Waxaa la iga dhaafay canshuurta laga jaro dakhliga maalgashiga, ama (b) Iima aysan soo sheegin Hay'adda Adeegga Dhakhliga Gudaha (IRS) in la iiga baahan yahay canshuurta laga jaro dakhliga maalgashiga sababo la xariira inaan ku guuldarestay inaan soo sheego dhammaan dulsaarka ama saami-qaybsiga, ama (c) IRS waxay igu wargelisay inaanan hadda i khuseyn canshuurta laga jaro dakhliga maalgashiga, iyo**

**III. Waxaan ahay qof Maraykan ah, oo uu ku jiro shisheeye degan Mareykanka (sida lagu qeexay tilmaamaha foomka W-9 ee laga heli karo www.irs.gov), iyo**

**IV. Xeerka (arka) FATCA (Foreign Account Tax Compliance Act, Xeerka U Hogaansamida Canshuuraha ee Akoonka Ajanabiga) ee lagu qoray foomkaan (haddii uu jiro) ee muujinaya in la iga dhaafay warbixinta FATCA waa sax.**

**Tilmaamaha Caddeynta:** Waa inaad istilaab saartaa shayga 2 aad ee kor ku xusan haddii ay ku ogaysiisey IRS in aad hadda lagaaga rabo canshuurta laga jaro dakhliga maalgashiga sababo la xariira inaad ku guuldareysatay inaad soo sheegto dhammaan dulsaarka iyo qaybaha canshuur celintaada. Fadlan ogsoonoow in foomkaan aysan kujirin meel u banaan xeerka ka dhaafitaanka FATCA, sidaas aawadeed sheyga 4 aad ma khuseeyo.

**Internal Revenue Service (Hay'adda Adeegga Dhakhliga Gudaha) uma baahna oggolaanshahaaga qoddob kasta oo ka mid ah dukumiintaan aan ka ahayn caddeynta loo baahan yahay si looga fogaado canshuurta laga jaro dakhliga maalgashiga.**

____________________

SAXIIXA QOFKA MAREYKANKA AH (Lama oggola saxiixyada elektarooniga ah, kuwa la geliyo ama istaamta)

____________________

Taariikhda: Foomkaan wuxuu sii shaqeyn doonaa 90 maalmood